



Ref: WDHI/XW/174/2017

Date: 29th November 2017

Ku: Madaxweyne kuxigeenka 1aad Dawlad-Goboleedka Jubbaland

Mudane Maxamuud Sayid Adan

Ku: Hey'adda Mashruuca TIS+

Og: Guddoomiyaha Gobolka Banaadir ahna Duqa Magaalada Muqdisho

Og: Madaxweynaha Dawlad-Goboleedka Jubbaland

Og: Ra'iisal Wasaaraha Xukuumadda JFS

Og: Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

Ujeedo: Jawaab Celin

Mudane Maxadweyne kuxigeen salaam sharafeed ka dib, Annaga oo tixraacayno warqaddii **summadeedu ahayd DD/JSS/SPD/028/2017** kuna taariikheysneyd **29/11/2017** oo aad u soo dirtay Wasaaradda Dhalinyarada iyo Isboortiga Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya oo ku saabsanayd dib u soo celinta gogoshii tartanka Kubadda Cagta ee Dawlad-Goboleeyada Xubanaha ka ah Dawladda Federaalka iyo Gobolka Banaadir ee lagu qaban lahaa Magaalada Kismaayo ayaa waxaa Shir deg deg ah isla maanta isugu yimid Wasiirka, Wasiir kuxigeenka iyo Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Dhalinyarada iyo Isboortiga Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya iyo Wasiirrada Wasaaradaha Dhalinyarada iyo Isboortiga Dawlad-Goboleedka Koofur-Galbeed, Hirshabeele, Galmudug, Guddoomiyaha Xiriirka Soomaaliyeed ee Kubadda Cagta, iyo Guddoomiyaha Xiriirka kubadda Cagta Gobolka Banaadir, waxaana khadka Taleefanka kaga qaybgalay kulanka Wasiirka Dhalinyarada Isboortiga, Shaqada iyo Shaqaalaha Dawlad - Goboleedka Puntland

Mudane Cabadiraxmaan Sheekh Axmed Cabdulle.